

Wixii Macluumaadka Kale ah oo Waxtar Leh

Haddii aad dhibaato ku qabto caafimaadkaaga maskaxda ama aad u baahan tahay caawimaad degdeg ah, waa inaad la xiriirtaa khadka dhibaataada ee degaankaaga:

Newham - 0800 073 0066

Hackney - 0800 073 0006

Tower Hamlets - 0800 073 0003

Cidda aad la xiriiri karto haddii aadan ku qancin adeeggayaga (PALS/ Cabashooyinka)

Qofna lama wadaagi doono wax macluumaad ah oo aad na siiso annaga oo aan kaala hadlin marka hore oo aanan helin ogolaanshahaaga. Marka kaliya ee ka reeban arrintaan waa haddii aan u aragno in noloshada ama badqabka qof kale ay halis geli karto.

Waxaanu soo dhawaynaynaa wixii jawaab-celin ah oo ku saabsan adeegyadayada markaa fadlan Adeegga La-talinta Bukaanka iyo Xiriirka kala xiriir telifoonka bilaashka ah 0800 783 4839 ama iimaylka: elft.pals@nhs.net.

Haddii aadan ku qanacsanayn adeegga iyo qaabka laguula dhaqmay, fadlan la hadal maamulaha adeegga si la iskugu dayo oo loo xaliyo arrintaan, ama la xiriir kooxda PALS.

Haddii aad rabto inaad cabasho gudbiso, waxaad:

☎ 0800 085 8354

@ elft.complaints@nhs.net

Warqad/iimayl u qori kartaa: Maamulaha Cabashooyinka iyo PALS, FREEPOST RTKB-ESXB-HYYX, Trust Headquarters, 9 Alie Street, London, E1 8DE.

Adeeggan waxaa la bixiyaa iyadoo lala kaashanayo:


East London
NHS Foundation Trust


Barts Health
NHS Trust


Homerton Healthcare
NHS Foundation Trust


East London
NHS Foundation Trust

Macluumaadka & Faahfaahinta Gudbinta ee Adeegga Badweynta London ee Bariga London



Bixinta Taageerada Shucuurta ee Naxarista leh ee Loogu Talagalay Dadka La Nool Dhaawaca Dhalmada iyo Kuwa Ay Dhalmada Carruur Uga Dhimatay

Waanu danaynaa, waanu ixtiraamaynaa, waanu nahay adeeg dhamaystiran.

ELFT_v2



Waanu danaynaa
Waanu ixtiraamaynaa
Waxaan nahay adeeg dhamaystiran

Yaanu nahay?

OCEAN waa adeeg isku-dhafan oo caafimaadka maskaxda iyo adeegyada hooyada ah oo ku yaala City & Hackney, Newham iyo Tower Hamlets kaas taageero siinaya haweenka iyo dadka dhalaya ee ay saameeyeen dhaawacyada dhalimada iyo dhimashada carruurtooda xilliga dhalimada.

Yaan Caawinnaa

Waxaan taageero siinaa shaqsiyaadka la kulmaya dhibaatooyin xagga caafimaadka maskaxda ah oo weyn, oo ka dhashay, ama la xiriira, uurkooda ama safarkooda dhalimada.

Kuwaas waxaa ka mid noqon kara dhibaatooyinka ka yimaada:

- Daaweynta IVF oo lagu celceliyey isla markaana lagu guulaysan
- Waayida uurka (oo ay ku jiraan dhiciska ilmaha ee wakhti kasta oo uurka ka mid ah ama iska soo xaaqida uurka)
- Maskax xanuunka laga qaado uurka
- Dhimashada dhalaanka
- Ka baqida ba'an ee dhalimada ilmaha (Tokophobia).

Adeegga Ocean ayaa awood u leh oo kaliya inuu bixiyo taageerada loogu talagalay hooyooyinka iyo dadka kuwaas oo dhalay wakhtigan Xubnaha qoyska, oo ay ku jiraan lammaanayaasha kuwaas u baahan taageerada caafimaadka dhimirka waa inay la xiriiraan Adeegga Daaweynta Hadalka ee East London Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli karaa khadka <https://www.elft.nhs.uk/get-help-emergency>

Sida Aan Dadka U Caawinno

- Daryeelka daweynta ee ka kooban taageerada cilmi-nafsiga iyo umulisada takhasuska leh oo isku dhafan
- Taageero kooxeedka
- Taageero kooxeed iyo taageero qof-ka-qof ah oo isku jira.



U gudbinta Ocean

Waxaa lagugu soo dhaweynayaa inaad is-gubdiso ama aad la hadasho GP-gaaga iyo/ ama xirfadlayaasha kale ee caafimaadka kuwaas oo kuu soo gudbin kara adeegga.

Foomamka gudbinta waxaa laga heli karaa websaydkeena:

ADEEGA CAAFIMAADKA MASKAXDA EE OCEAN - BARIGA LONDON

<https://www.elft.nhs.uk/services/ocean-mental-health-service-east-london>

Tel: 020 3222 8047

limaylka: elft.eastlondonocean@nhs.net

Waxaan furannahay laga bilaabo 9.00 subaxnimo - 5.00 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha (marka laga reebo dhammaan maalmaha Fasaxyada Bangiga UK).

Fadlan ogow in aanu ahayd adeeg dhibaaton oo la tacaala xaaladaha degdegga ah waxaana jira wakhti sugitaan si loo helo adeegyadeena.

Haddii OCEAN aysan ahayn adeegga ugu habboon, dhakhtarka baaritaanka samaynaya ayaa kuu aqoonsan kara oo kula talin kara adeegyada ugu wanaagsan ee aad ka heli karto taageero.

Haddii aad tahay qof isticmaala adeegga oo leh khibrad nololeed oo aad jeclaan lahayd inaad ka qayb qaadato gacan ka geysashada qaabaynta adeegyada OCEAN ama adeegyada dhalimada, fadlan Rachael Buabeng kala xiriir iimaylka: rachael.buabeng@nhs.net.

Waanu danaynaa, waanu ixtiraamaynaa, waanu nahay adeeg dhamaystiran.